

**XIRIIRADU MAR WALBA MA AHA KUWO FUDUD.**

**WADAHADALADU WAX WEYN AYEY KA BEDDELI KARAAN XAALADDA.**

La-talinta qoyska ee degmadu waxay u taagan yihiin qofka raba taageero dhanka xiriirka ah. Waxaanu ka caawinaa lammaanaha iyo qoysaska inay xalliyaan dhibaatooyinka iyo khilaafaadka, ha noqoto xiriirada hadda jira ee lamaanayaasha ah ama kuwii hore. La-talinta qoysku waxay sidoo kale taageero bixin kartaa xilliyada dadka kala tegeyo ee ay is-furrayaan.

Dadka dhammaantood waa la soo dhoweynayaa, iyadoo aan loo eegin jinsiga, da'da, nooca galmada qofku yahay, aqoonsiga jinsiga, qowmiyadda, diinta ama naafanimada (baahiyaha gaar ah). Waxaad noqon kartaa qof aan magaciisa la aqoon, wadhadalladuna waxay u dhacayaan si sir ah oo buuxda.

Si aad u qabsato waqti ama ballan, waxaad la xiriirtaa la-talinta qoyska ee degmada.